

TIROKOOB 101: WAXAAD U BAAHANTAHAY IN AAD OGAATID

Tirokoobkii 2020 waa inasoo gudo galey!
Hoos waxaa ku qoran is xasuusin ah waxa uu yahay iyo muhummadiisa.


Cidna laga tegi maayo.

Tirokoobku waxuu tirinayaa qof kastoo ku nool Mareykanka hal mar, hal mar keliya, iyo goob sax ah oo uu ku sugan yahay.



Waa matalid caddaalad ah.


10-kii sannoba mar, natijada tirokoobka ayaa loo adeegsadaa in lagu saami qaybsado Aqalka Xildhibaanada, taasoo cayinta inta kursi ee gobol kastaa helayo.




Dastuurka ayey ku jirtaa.

Dastuurka Mareykanka ayaa dhigaya in cidkasta oo waddanka ku nool la tirokoobo 10-kii sannoba mar. Tirokoobkii u horeeyay waxaa la qabtay 1790-kii.

Waa qoondaynta \$675 billion.



Qaybinta dhaqaale kor u dhaafya \$675 billion oo federaalku ku caawiyo gobolada ayaa ku saleysan xogta tirokoobka. Lacagtaas ayaa loo istimaalaa dugsiyada, cisbitaalada, waddooyinka, arimaha bulshada iyo mashaariic kaloo muhiim ah.




Waa degmo bixinta.


Tirokoobka 10-kii sannoba ka dib. Mas'uuliyiinta gobaladu waxay dib u nashqadeeyaan xaduudaha degmooyinka xildhibaanandu kasoo baxaan iyadoo loo tixraacayo is bedelka tirada dadweynaha.

Waa howl qaran in aad ka qayb qaadatid.


In aad tirokoobka buuxisaa waa qasab. Waa hab aad uga qayb qaadanaysid dimuqraasiyadeena adigoo leh "WAAN JIRAA!"



Xogta Tirakoobka waxay saameyn ku leedahay noloshada.





Mujtamacu waxuu u adeegsadaa xogta tirakoobka si ay u taageeraan dadaallada bulshada ee ku lug leh shard dejinta, tayada noloshada iyo ololayntaba.



Ganacsiyadu waxay u adeegsadaan xogta tirakoobka si ay ugu go'aan qaataan halka laga dhisayo, warshadaha, xafiisyada iyo dukaamada, kuwaas oo shaqo abuura.

Dowladaha hoose waxay u adeegsadaan tirakoobka arimaha sugida nabadgelyada dadweynaha iyo u diyaar garowga gurmadka.





Shirkadaha dhismahu waxay tirakoobka u adeegsadaan meelaha ka dhisi lahaayeen guryo cusub iyo siday dib ugu dayactiri lahaayeen xaafadaha qadiimiga ah.



Xogtaadu waa mid la ilaaliyey.

Waa denbi in Xafiiska Tirakoobku uu si caam ah u sii daayo jawaabahaaga taasoo cadeyn karta qofka ama reerka aad tahay.

Shard ahaan jawaabahaaga looma adeegsan karo wax adiga ku lidi, 1a, waxaa loo adeegsan karaa ti akoob ahaan oo keliya.



Na caawi.

Haddii aad khibrad u leedahay, waan u baahanahay fikirkaaga ku aadan sida ugu fiican ee loo sugi karo in la tiriyo qofkasta oo deegaankaaga ka mid ah.

2020-gu aad buu uga sahlanaanayaa kuwii hore.

Sanadka 2020-ka waxaad fursad u helayaa in jawaabaha ku bixiso online ama khadka internetka.

